



# **GUDIGA MAGAALADA SEATTLE**

## **BUUGGA TILMAAN-BIXIYAHA QAABKA MIISAANIYADA SEATTLE**



**2012 MIISAANIYADDA**



# TUSMADA

## Gudaha daabacaadaan:

---

Soo Dhawaawo	<b>3</b>
Doorka Duqa Magaalada iyo Gudiga	<b>4</b>
Fahamka Hawsha Miisaaniyadda Magaalada	<b>5</b>
Baaqyada ku saabsan sida aad Kaalmo ugu Heshid Mashruucaada	<b>9</b>
Jadwalka Dib u Fiirinta Miisaaniyadda	<b>11</b>
Jadwalka Dib u Fiirinta Miisaaniyadda	<b>12</b>
Nala soo Xariir	<b>13</b>
Sidee ayaan Codkeeyga u Maqashiin Karaa?	<b>14</b>
Xaggee Ayaan ka Heli Karaa Macluumaad Badan?	<b>15</b>



## KU SOO DHAWAAW TILMAANTA LA SIIYO MUWAADINKA XAGGA MIISAANIYADDA SEATTLE

**D**ajinta miisaaniyadda magaalada waa hawl culus, waa mid u baahan dadaal badan, waqti badan iyo – in si sax ah loo sameeyo – si taxadir leh loo kala hormariyo danaha iyo in tallo la taaban karo laga helo muwadiniinta.

Anaga oo tan maanka ku haayno ayaan sameeynay buuggaan ku saabsan tilmaanta miisaaniyadda. Waxaan rabnaa in aan muwadiniinta ku kaalmeeyno in ay si wanaagsan u fahmaan miisaaniyadda, hawsha adag ee aan u marno mararka qaar iyo in aan bixino tallooyin ku saabsan sida raad loogu yeesho hawsha marka lalla hadlo xubnaha gudiga ama marka laga hadlaayo dhageeysiyada dadweynaha.

Inkastoo dokumentiga dhabta ah ee miisaaniyadda Seattle la'eg yahay buugga weyn ee telefoonka magaalada, laakin dadka daneeyo siyaadadda dadweynaha, waxay u arkaan in ay tahay masawir daacad u ah sida magaalada u kala hormariso danaheeda iyo waddada loo maro mustaqbalka .

Waxaan rajeyneynaa in aad ku soo biirtid safarkena. Gudbinta miisaaniyadda ayaa aad muhiim u ah mana lagu dhaafi karo dad yar – waxay qaadataa tuulo – adigana waxaad tahay qeyb ka tirsan tuuladaas.

Waad ku mahadsan tahay in aad ka soo qeyb qaadatay!

Richard Conlin  
Madaxa Gudiga Magaalada  
Seattle

Jean Godden  
Agaasimaha Gudiga  
Miisaaniyadda iyo Maaliyadda



## DOORARKA DUQA MAGAALADA IYO GUDIGA

### Duqa Mike McGinn

[www.seattle.gov/mayor/](http://www.seattle.gov/mayor/)

**D**uqa waa Fuliyaaha Sare ee magaalada, sannad kastana wuxuu isaga mas'uul ka yahay in ay soo jeediso miisaaniyad isku dheelitiran iyo Barnaamijka Hagaajinta Hantida [Capital Improvement Program (CIP)] ee lexda sanno. Duqa Magaalada waa in uu soo gudbiyo miisaaniyadda la soo jeediyay ugu dambeyn dhamaadka bisha Sateembar.

Kaddib marka la soo jeediyo, Duqa iyo shaqaalahiisa waxay la shaqeeyaan gudiga si loo gabogabeeyo dokumentiyadaan. Duqa wuxuu kaloo mas'uul ka yahay in la hubsado in waaxyada kala duwan ee magaalada hirgeliyaan miisaaniyadda la dhaqan geliyay.

Inta lagu jiro sannadka, waxaa dhici karta in loo baahdo in isbedel lagu sameeyo miisaaniyadda, marka guud ahaan, isbedeladaan waxay ka bilowdaan Duqa Magaalada.

### Gudiga Magaalada

[www.seattle.gov/council/](http://www.seattle.gov/council/)

**G**udiga waa laanta dajisa sharciyada dawladda magaalada taasoo doorkaan ku tix-gelisa sharciyada la soo jeediyay kana soo saarta siyaasadda ballaaran ee magaalada. Gudiga wuxuu tixgeliyaa miisaaniyadda iyo CIPda uu soo jeediyay Duqa magaalada, wuxuuna bedelli karaa kharashka la soo oggolaaday si loogu dheeli tiro danaha siyaasadda gudiga.

Marka gudiga sameeyo bedelaad, waa in ay isku dheelitirto daqliga iyo kharashka. Tusaale ahaan, kharash kasta oo dheeraad ah waa in uu la socdo meelo kale oo laga gooyo kharashka ama daqli dheeraad ah. Gudiga waa in uu dhameeystiro dib u fiirintiisa Miisaaniyadda La Soo Jeediyay ugu dambeeyn dhamaadka Nofembar.

Ka hor inta isbedel lagu sameeynin Miisaaniyadda La Soo Jeediyay, gudiga wuxuu tallo ka raadiyaa dadweynaha. Dadweynaha waxay fursad u leeyahiin in ay marag toosan ka bixiyaan dhageeysiyada dadweynaha iyo/ama shirarka Gudiga Miisaaniyadda magaalada. Xubnaha Gudiga waxay kaloo soo dhaweyaan tallooyinka lagu soo diro e-mailka, telefoonka, iyo shirarka lagu kulmo.

Sannadkii, gudiga wuxuu kaloo dib u fiiriyaa isbedellada laga soo jeediyay miisaaniyadda waxuuna dadweynaha ku dhiirgeliyaa in ay tallo ka bixiyaan shirarkan.



## FAHAMKA HAWSHA MIISAANIYADDA MAGAALADA

Hawsha miisaaniyadda waxay ku dhisan tahay saddax qeyb oo muhiim ah:

### **Saadaalinta Daqliga**

Magaalada waa in ay ku shaqeeyso miisaaniyad isku dheeli tiran – kharashka kama badan karo daqliga la filaayo. Sidaas darted, saadaalinta daqliga sannadka soo socda waxay qeexdaa maal gelinta la qoondheeyay miisaaniyadda gudaheeda. Saadaalinta daqliga hore waxaa la soo raaciyaa miisaaniyadda la soo jeediyay, laakin waa in wax laga bedello haddii xaaladaha dhaqaalaha ama qodobo kale bedelaan daqliga la filaayo ee magaalada. Saadaalinta daqliga oo la soo koobay ayaa lagu muujiyay qeybta kowaad ee dokumentiga miisaaniyadda.

### **Miisaaniyadda Lagu Shaqeeyo**

Miisaaniyadda magaalada ku shaqeeyso ayaa qoondheeyso maalgelinta la siiyo dhamaan waaxyada magaalada, waxaana ka mid ah danabka dadweynaha ee magaalada. Sannadkii 2011, wadarta miisaaniyadaan waxay qiyaas ahaan ahayd \$3.8 balyan. Waxaa dokumentiga miisaaniyadda lagu tafatiraa qoondheynta qaaska ah heerka waaxda.

### **Barnaamijka Hagaajinta Hantida**


Sannad kasta magaalada waxay dhaqan gelisaa qorshaha hantida lexda sanno kaasoo saadaaliyo hantida ku baxda waax kasta magaalada. Barnaamijka Hagaajinta Hantida [Capital Improvement Program (CIP)] waa dokumenti gaar ah oo lalla diyaariyay miisaaniyadda.





## U KALA QAYBINTA MIISAANIYA MAGAALADA EE AFARTA NOOC MAAL-GALINTA SALDHIGA U AH

### Wadarta Miisaaniyada La Ogolaaday 2011 \$ 3.8 Bilyan



#### Dakhliga Guud Magaalada

Dakhliga maal-galintaan waxay ka yimaadaan sal-dhiga canshuurta magaalada sida canshuurta hantilaha iyo canshuurta iibsashada tafaariiqda. Sal-dhiga maal-galintaan waxaa loogu adeegaa howlaha magaalada sida ciidanka booliiska, ciidanka dabdamiska, beeraha ama jardiinooyinka lagu nasto iyo u adeega howlaha dadweynaha.

#### Seattle City light

Seattle City Light waa alaad ama qalabka isticmaalka oo leeyahay dowlada hoose deegaanka, waxayna bixiyaan korontada ay isticmaalaano guryaha la degan yahay iyo goobaha ganacsiga Magaalada Seattle. Qarashka Isticmaal howlahaan lagu bixiyaa waxaa lagu dalacaa qiimaha lacagta siciraka kala duwan macmiil ama kalyantaga

#### Seattle Public Utilities

Seattle Public Utilities waxay ka shaqeeyaan si wadajir ah adeegyadaan sida biyaha Magaalada, bulaacadaha, biyo-saarista iyo qashin aruurinta. Adeegyadaa waxaa lagu dalacaa qiimaha lacagta sicirka ka madax-banaan howl-qabad kastaba.


#### Kuwa Kale

Maal-galinta qaybtaan waxaa laga helaa khayraad goobo kala duwan. Tusaale, magaalada waxay heshaa maal-galino fara badan oo ka yimaado dhaqaalaha Gobolka Washington iyo Dowlada Is-bahaysiga. Qaybo ka mid ah maal-galintaan waa lawada qaybsadaa si wadajir ah isticmaalkooda, inta badan waxaa loo isticmaalaa ujeedooyin gaar ah kaliyah. Intaa waxaa dheeraad ah, cod-bixiyaasha magaalada Seattle waxay ansixiyeeyn canshuuraadka hantilayaasha oo fara badan oo saro loogu qaadaayo maal-galinta mashaaricda ujeedooyin gaar ah. Maal-galinta canshuurta ku waajibyeelida waxaa ka mid ah: The families and Education Levy; the Housing Levy; the Park Levy; the Pike Place Market Levy; iyo the Bridging the Gap Transportation Levy



## MAALIYADDA GUUD

### Ilaha Daqliga Maaliyadda Guud




**M**aaliyad dhexe taaso lagu shubo daqliga canshuurta guud ee magaalada iyo ilaha la go'aamiyo, taasoo la qoondheeyo si loo taageero hawlaha badan ee dawladda magaalada.

- ◆ Canshuurta laga qaado hantida maguuraanka ah waa isha keliya ee ugu weyn ilaha Maaliyadda Guud ee magaalada. Wakaalado kala duwaan oo ka tirsan dawladda, kana mid ah Dakadda, Dugsiga Degmada, Degmada iyo Gobolka ayaa iyagana qaada canshuurta hantida maguuraanka. Qiyaas ahaan, magaalada waxay mas'uul ka tahay bilka saddax meel marka loo dhigo hal canshuurta hantida maguuraanka.
- ◆ Ganacsiga iyo Shaqada [Business and Occupation (B&O)], libka Tafasiisha (Retail Sales), iyo canshuurta Danabka (Utility), kuwasoo mattala ku dhaawaad 60% daqliga Maaliyadda Guud, waxaa bedela xaaladaha dhaqaalaha deegaanka – si wanaagsan ayaay u kordhaan waqtiyada wanaagsan balse wey hakadaan ama yaradaan waqtiyada darran.



## Isticmaalka Daqliga Maaliyadda Guud



**M**aaliyadda Guud waxay bixisaa adeegyada jaaliyadda ee muhiimka ah sida booliiska, dab damiska, beeraha lagu nasto iyo maktabyada.

- ◆ Xasuuso in booliiska, cadaaladda dembiyada iyo dabka ku baxdo in ka badan 50% kharashka Maaliyadda Guud.
- ◆ Inkastoo adeegyada aadanaha iyo gaadiidka ku baxdo qeyb yar oo ka mid ah kharashka Maaliyadda Guud, hawlahaan waxay kalo kaalmo ka helaan ilaha Federaalka iyo Gobolka iyo canshuurta hantida maguuraanka ay codbixiyee-nada oggoladaan. Jaantuskaan laguma muujinin maalgelintaan dheeraadka ah.



## SIYAABAHA KAALMADA MAGAALADA LOOGU HELO MASHRUUCAADA

**B**adanaa magaalada waxay daneeysaa in ay kaalmo siiso mashariicda iyo hawlaha xaafadaha, laakin ilaha waa kooban yahiin marka la fududeeyna magaalada ma maalgelin karto dhamaan mashariicda qiimaha leh. Marka lagu shaqeeyo culeyskaan, waxaa dhici karto in tallooyinka soo socdo kugu kaalmeeyaan si aad kaalmo uga heshid magaalada.

### **Dib u Fiiri Barnaamijyada Jira Horta**

Waxaa dhici karto in barnaamijyada sida Maaliyadda Xaafadda iyo Maaliyadda Waddada Xaafadda bixiyaan fursado taageero looga heli karo ilaha barnaamijyada jira. Waxaa dhici karto in Waaxda Xaafadda, Waaxda Gaadiidka Seattle, iyo wakaalado kale oo ka tirsan magaalada kaalmeeyaan dib u fiirinta xagga xaq u yeelashada barnaamijyada noocaas ah.

### **Horay u Bilaaw**

Codsigaada maaliyadda kala hadal hoggaamiyeyaashaada la soo doortay iyo hoggaamiyeyaasha waaxyada. Waxaa wanaagsan in la bilaabo qeybta hore kuleylaha marka madaxda waaxyda isu geeyaan codsiyadooda si Duqa Magaalada u tixgeliyo. Duqa wuxuu soo diyaariyaa miisaaniyad la soo jeediyay muddada kuleylaha si uu ugu soo bandhigo gudiga magaalada dhamaadka bisha Sateembar. Xaggaaga marka lagu guda jiro hawsha miisaaniyadda, sagaalka xubin la doortay ee ka tirsan xubanaha gudiga waxay dib u fiiriyaan miisaaniyadda duga magaalada. Waxay sameeyaan bedelaad, ku darridda ama ka go'ynta shay. ***Waxaa in badan waxtar leh in horaantiiba la weydiisto Duqa magaalada tixgelin halkii la suggi lahaa marka miisaaniyadda soo gaarto gudiga oo markaas goor dambe lagu darro shayga.*** Bacdama Duqa magaalada soo gudbiyo miisaaniyad isku dheelitiran, ku darridda shay waxay la macno tahay ka go'ynta in la'eg, taasoo aan sahal ahayn.

### **Isticmaal dood ku saleeysan xaqiiqada**

Marka la soo jeedinaayo ku-daridda miisaaniyadda, waa in ay muwadiniinta yimadaan iyaga oo diyaarsan si loo sharaxo mashruuca iyo in ay soo bandhigaan xaqiiqadaha taageersan ku-daridda ama sii waddida maalgelinta barnaamijka. Inkastoo macluumaadka kaftanka iyo sheekooyinka ku saabsan noloshu dhabta ah waxtar leeyahiin, waxaa wanaagsan in laga bilaabo xaqiiqadaha.

### **Caddee ujeedooyinkaada**

Caddee hana la taaban karo waxyaabaha aad isku dayaaysid in aad gaartid kana samee dokumenti waxa aad ka codsanaysid magaalada.



## TALLOOYINKA LAGU HELO TAAGEERADA MAGAALADA EE MASHRUUCAADA

### **Muuji taageero sal ballaaran**

In mashruucaada helo taageero ballaarsan, ayaa wanaagsan. Warqadaha ka socda ururada taageersan, gudiyada bulshada, xafiisyada ganacsiga iyo gudiyada xaafadaha degmada ayaa codsigaada siin kara kaalmo.

### **Codsigaada la xariiri qorshaha xaafadda ama danta gudiga**

Si aan la cabbiri karin ayaay waxtar u leedahay haddii aad muujin kartid in codsigaada la xariiro ujeedo la taaban karo ay leedahay gudiga ama danta qorshaha xaafadda.



### **Muuji in aad taageero ka haaysatid ilo kale**

Haddii aad farta ku fiiqi kartid taageerada dhaqaalaha laga heli karo ilo kale, waxay kiis wanaagsan u sameeysa mashruucaada. Fursadda lagu helo maaliyad kale ayaa dood wanaagsan u sameeyso taageerada magaalada.

***Mar kale, sida ugu wanaagsan ee lagu helo taageerada magaalada waa in aad codsigaada soo gudbisid horaantiiba.***

**M**agaalada waxay taageersan tahay adeegyada aadanaha kala duwan taasoo loo maray maal gelin la siiyay Waaxda Adeegyada Aadanaha. Iyada oo ay ka mid tahay hawsha miisaaniyadda sannadka, Gudiga iyo duqa waxay maaliyad u dhigaan meelaha barnaamijyada guud ee Waaxda Adeegyada Aadanaha iyo guud ahaana maaliyad **uma** dhigaan urur qaas ah ama wakaalad. Gudiga wuxuu tixgeliyaa qoondhenta heerka barnaamijyada guud taaso u furan tallooyin ku saabsan barnaamijyada loo baahan yahay in loo arko in ay ku jirto danta. Hase ahatee, Waaxda Adeegyada Aadanaha waxaa loo xil saaray qeybinta maaliyadda ku habboon barnaamij kasta. Tan waxaa lagu sameeyaa habka codsiga-lagu-dalbo-soo-jeedinta (RFP) taasoo dhamaan bixiyeyaasha adeegga aadanaha u oggolaata in ay si caddaalad ah ugu tartamaan maalgelinta magaalada. Ururada raba in ay helaan kaalmada magaalada xagga barnaamijka adeegyada aadanaha waa in ay la xariiraan Waaxda Adeegyada Aadanaha si ay u ogaadaan marka la qaban doono RFPga xiga ee barnaamijkooda qaaska ah.



## JADWALKA DIB U FIIRINTA MIISAANIYADDA

### **Abril – Maajo:**

Waaxyada waxay la shaqeeyaan Waaxda Maaliyadda si loo dajiyo miisaaniyadda jadwalka loona aqoonsado kala danaha labada sanno.

### **Maajo – Juunyo:**

Iyaga oo la shaqeeynaayo Waaxda Maaliyadda, waaxyada waxay horumariyaan “Warqadaha Arrimaha Miisaaniyadda” ee sharaxa isbedellada ku dhici kara miisaaniyadda jadwalka.

### **Luulyo – Sabteembar:**

Duqa wuxuu dib u fiiriyaa warqadaha arrimaha miisaaniyadda, wuxuuna waafajiyaa qiyaasta daqliga la bedellay wuxuuna gudiga u gudbiyaa miisaaniyad isku dheelitiran ugu dambeeyn dhamaadka Sateembar.

### **Oktoobar – Nofeembar:**

Gudiga wuxuu dib u fiiriyaa miisaaniyadda uu soo jeediyay duqa, wuxuu tix geliyaa isbedellada jiri kara iyo wuxuu soo gudbiyaa miisaaniyad isku dheelitiran kama dambeynta 1da Diseembar.



# Muraajacada Miisaaniyada ee Gudiga Sare Magaalada Seattle

## Jadwalka Xiliga Dayrta 2011

Gudoomiyaha Degmada Wuxuu soo Bandhiga Qorshaha Miisaaniyada iyo Qorshaha CIP		Dhaqaysiga Dadweynaha iyo Miisaaniyada Gudiga La qabatimaayo		Shirarka Gudiga Miisaaniyada iyo Ka baaraandagida Gudiga Sare		
SAACADAHA IYO TAARIKHDA SHIRARKA WAA LA BADALIKARAA						
AXADA	ISNIINTA	TALADADA	ARBACADA	KHAMIISTA	JIMCAHA	SABTIGA
<b>Sbteembarr 2011</b>						
25	26 Gudoomiyaha Degmada oo soo bandhigaayo 2012 Qorshaha Miisaaniyada iyo 2012 - 2017 Qorshaha CIP	27	28	29	30	
<b>Oktoobar 2011</b>						
						1
2	3	4 Dhaqaysiga Dadweynaha: 5:30 p.d. Seattle City Hall Council Chambers 600 4th Ave, 98104	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26 Dhaqaysiga Dadweynaha: 5:30 p.d. Seattle City Hall Council Chambers 600 4th Ave, 98104	27	28	29
30	31					
<b>Noofeembar 2011</b>						
		1	2	3	4	5
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21 Ogolaashaha La soo dhameeystiraayo ee Gudiga Sare Miisaaniyada 2012	22	23	24	25	26



**Richard Conlin**  
**Council President**  
 richard.conlin@seattle.gov  
 (206) 684-8805  
 Gudoomiyaha Gudiga  
 Horumarinta Gobolka  
 iyo Isku Tashiga



**Sally Bagshaw**  
 sally.bagshaw@seattle.gov  
 (206) 684-8801  
 Gudoomiyaha Gudiga  
 Bartamaha Seattle  
 iyo Beeraha



**Tim Burgess**  
 tim.burgess@seattle.gov  
 (206) 684-8806  
 Gudoomiyaha Gudiga  
 Amaanka Dadweynaha  
 iyo Waxbarashada



**Sally J. Clark**  
 sally.clark@seattle.gov  
 (206) 684-8802  
 Gudoomiyaha Gudiga  
 Dhismaha Deegaanka



**Jean Godden**  
 jean.godden@seattle.gov  
 (206) 684-8807  
 Maaliyadda iyo Miisaaniyadda;  
 Gudoomiyaha Gudiga  
 Miisaaniyadda



**Bruce Harrell**  
 bruce.harrell@seattle.gov  
 (206) 684-8804  
 Gudoomiyaha Tamarta,  
 Farsamada iyo  
 Gudiga Xuquuqda Madaniga



**Nick Licata**  
 nick.licata@seattle.gov  
 (206) 684-8803  
 Gudoomiyaha Gudiga Guryeynta,  
 Adeegyada Aadanaha,  
 Caafimaadka, iyo Hidaha



**Mike O'Brien**  
 mike.obrien@seattle.gov  
 (206) 684-8800  
 Gudoomiyaha Gudiga  
 Danabka Dadweynaha  
 Seattle iyo Xaafadaha



**Tom Rasmussen**  
 tom.rasmussen@seattle.gov  
 (206) 684-8808  
 Gudoomiyaha Gudiga Gaadiidka



## SIDEE BAA U SAMEEYNAYAA IN LA MAQLO COD-KAYGA AMA RA'YIGEEGA?

Gudiga Sare Magaalada Seattle wuxuu ku siinayaa habab fara badan oo aad ugu qaybgalayso qaabka maal-galinta sanadkaan

◇ **Ka soo qaybgalka** hal ka mid ah labada **Shir Dhagaysiga Dadweynaha**

**Goorta: Talaadada, Oktoobar 4 & Arbacada, Oktoobar 26**  
5:00 g.d. Saxiixa magacyadda  
5:30 g.d. Dhagaysiga Dadweynaha

**Goobta:** Seattle City Hall  
Council Chambers, 2<sup>nd</sup> Floor  
600 Fourth Avenue, 98104

◇ **Ka Fiiro ama ka Daawo**

Si toos ah ugu daawo shirarka goobta shabakada  
[www.seattle.gov/council](http://www.seattle.gov/council)

Si toos ah ugu daawo shirarka taleefishinka Seattle Channel 21  
Cajaladaha Shirarka la duubay – soo wac Seattle Channel at (206) 684-8824 ama soo booqo: [www.seattlechannel.org](http://www.seattlechannel.org)

◇ **Emaaylka**

Fadlan ina soo wac ama u soo qor jawaab-celintaada. Akhbaaraha xariirka waxaa ka helaysaa bugga 13 buukaan.

Cinwaanka Adareeska Boostada: PO Box 34025, Seattle, WA 98124-4025

◇ **Dhagaysashada**

Waxaa lagu diyaariyey dhagaysiga cajaladaha sida tooska ah  
(206) 684-8566





## HALKEE AAN KA HELAYAA AKHBAARAHA DHEERAADKA AH EE MIISAANIYADA?

### Goobaha Shabakada:

<http://www.seattle.gov/council/budget/>

<http://www.seattle.gov/financedepartment/budgetarchives.htm>

<http://clerk.seattle.gov/~public/Budget.htm>

### Koobiyada Dokumeentiga oo la daabacay

City Clerk, Research Room, 600 4th Avenue, Floor 3

Koobiyada dokumeentigaan oo la turjumay waa laguu diyaariyey adigoo, soo wacaayo taleefoonkaan (206) 684-8888.

Waxaa laguu diyaarinayaa goorta aad soo codsato deegaan-galin suurtagal ah.

